Somali

Goob-cayaareed dabiici oo ku taalla park-ka cusub oo ku yaalla goobtii hore ee Ruthven Primary School.

Golaha wuxuu kala shaqaynayey bulshada hawl naqshad loogu samaynayo goob-cayaareed ku taalla park-ga cusub ee ku yaalla Dugsigii Hoose Ruthven Primary School oo ku yaalla wadada Tracey Street iyo Glasgow Avenue, Reservoir.

Naqshada goobcayaareedku waxay ku timid tala-soo-jeedinta bulshada intii lagu jiray heerka hawlgelinta bulshada ee sanadihii 2017-2019 ee dib-u-qaabaynta Qorshaha Guud ee Ruthven Master Plan. Master Plan-ka waxaa aqbalay Golaha sanadii 2020 waxayna abuuri doontaa Park-ga ah goob dhireed cusub.

Naqshada Goob-cayaareedka cusub

Naqshada goob-cayaareedka cusubi waxay diirada saartaa meel dabiici ah oo ay ku cayaaraan carruurta da' walba leh. Naqshada waxaa ku jira alwaaxyo iyo xargo ay wax ku fuulaan carruurta korani, meel dhalintu ku cayaarto, isku lusho, aallada la isku wareejiyo, stepper logs iyo dhagxaanta.

Heerka ugu horreeya ee goobta cayaartu waxay abuuri doontaa fursadaha fuulista, iska laadlaadinta, qaalma rogashada, boodada, isudheelitirka iyo iswareejinta. Qalabku badanaa wuxuu ahaanaya alwaax, dhagxaan, xargo iyo midaba dabiici ah, oo la dhexgeliyo goobta cayaarta ku fidsan dhuldhireedka sanctuary-ga kaynta.

Waxaanu hadda raadinaynaa aragtida bulshada si ay nooga caawinto naqshada goobta-cayaarta.

Fadlan noo sheeg waxaad u malaynayso aragtida naqshada goobta cayaarta si aan ugu dhamaystirno naqshada adiga aragtidaada! Goobta cusub ee cayaarta waxaa la dhisi doonaa aakhirka 2021 waxaana lagu bixinayaa kharajka Caamimada Xukuumada Fiktooriya.

Sidee qayb uga qaadan kartaa

Si aad u aragto naqshada goob-cayaareedka si faahfaahsan, fadlan booqo yoursaydarebin.com.au/ruthvenplayspace

Waxaad awoodaa inaad isticmaasho sanduukha aragti dhiibashada si aad noogu sheegto aragtidaada ku saabsan aragtida luqadaada ee naqshada goob-cayaareedka Ruthven Park.

Waxaanu weydiinaynaa dadka inay noo sheegaan qaybta ugu muhiimsan naqshada iyaga, si aanu u xaqiijino in waxyaallahaas sanadkaan lagu dhiso sanadkaan.

Waxaad kaloo codka siin kartaa midabka aad doorbidayso qalabka cayaarta.

Haddii aad jeclaan lahayd inaad ka hadasho naqshada aadna wax kaga tiraahdo afkaaga, fadlan nagula soo xiriir email-ka ah City.Design@darebin.vic.gov.au ama wac 8470 8470

Fadlan soo dir aragtidaada ugu dambayn **Axada 28da Febraayo.**